

Arjiga Ka-Dhaafidda Khidmadda

Darajooyinka K-6



- Fadlan akhri Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga (School Fees Notice) ka hor inta aadan buuxinin Arjigaan.
- Khidmado LAGUMA soo dallaco hawlaha maalin dugsiyeedka caadiga ee darajooyinka K-6. Arjigaan ka-dhaafidda khidmadda waxaa lagu dabaqaa oo keliya khidmadaha lagu soo dallaco hawlaha dibadda ka ah maalin dugsiyeedka caadiga.
- Haddii dugsiga la soo gaarsiiyo xaqijinta in ardayga uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda, waa in ardaygaas laga dhaafo DHAMAAN khidmadaha.
- Dhamaan macluumaadka ku qoran arjigaan waxay ahaan doonaan qarsoodi.

MACLUUMAADKA ARDAYGA:

Magaca ardayga: _____ Nambarka Ardayga #: _____

Cinwaanka: _____

Dugsiga: _____ Heerka darajada: _____

Magaca waalidka ama ilaalayaha: _____ Nambarka telefoonka: _____

AASAASKA KA-DHAAFIDDA KHIDMADDA:

Fadlan hubso xaq u yeelashada lagu dabaqo: (1 keliya ayaa loo baahan yahay)	Xaqijinta loo baahan yahay in la gudbiyo: *
1. Qoyska wuxuu qaata TANF/FEP (Kaalmada ku Meelgaarka ee la siiyo Qoysaska u Baahan (Temporary Assistance for Needy Families) ama Brograamka Shaqada Qoyska (Family Employment Program) (kaalmada maaliyadda ama kuboonka raashinka)	• xaqijinta manaafacaadka ee laga qaato Waaxda Adeegyada Shaqaalaha Utah (Utah Department of Workforce Services) muddada la raadsado ka-dhaafidda khidmadda, taasoo ahaan karta sawirka elataroonigga shaashadda (screenshot) xaq u yeelashada ama xaaladda.
2. Ardayga wuxuu qaataa Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka (Supplemental Security Income) (SSI, CUNUGGA XAQA U YEESHA EE LOO AQOONSADO IN UU QABO ITAAL DARRI)	• warqadaha xaqijinta manaafacaadka ee laga qaato Maamulka Soshal Sekuritiga (Social Security Administration)
3. Ardaygu waxa uu ka soo baxay shuruudaha ku xiran McKinney-Vento.	• Waxaa laga xaqijiyey Xiriiriyaha degmada ama dugsiyada gaar ah ee McKinney-Vento.
4. Ardayga wuxuu ku sugan yahay Daryeelka Korinta (Foster Care) (ee hoos yimaada Utah amd kormeerka dawladda hoose)	• foomka qabashada daryeelka dhalin yarka iyo warqadda diiwaan gelinta dugsiga, kaasoo ay buuxiyaan shaqaalaha kiiska lagana soo qaato Qeybta Adeegyada Cunugga iyo Qoyska ee Utah (Utah Division of Child and Family Services) ama Waaxda Caddaaladda Dhalinta ee Utah (Utah Juvenile Justice Department)
5. Ardayga wuxuu ku jiraa Xabsiga Gobolka (State Custody)	
6. Ardayga xaq ayuu u leeyahay sida ku saleysan xaqijinta dakhliga qoyska/reerka Tirada guud ee xubnaha qoyska: _____ Wadarta dakhliga qoyska: \$ _____	• xaqijinta dakhliga qoyska oo ah qaabka bayaanka dakhliga, dabada jeegagga mushaarka, ama canshuur celinta. (Fiiri bogga 2.)

*Fadlan xasuuso: Dugsiga wuxuu kaa rabaa in aad keentid xaqijinta xaq u yeelashada. Fadlan waxaad warqadaha xaqijintaada ku lifaaqdaa foomkaan marka aad arjigaan u gudbineysid dugsigaada. Sida kaliya ee uu kaga soo baxay shuruudaha McKinney-Vento.

Haddii aan lagu dabaqi karin inta ku qoran kor balse aad dooneysid in aad dalbatid ka-dhaafidda khidmadaha maxaa yeelay waxaa jira daruufo kale oo adag, fadlan tilmaan sababta (asbaabta) ka dambeeyso codsiga: _____

(Fadlan ku soo lifaaq bog dheeraad ah haddii loo baahdo.)

Fadlan waxaad arjigaan u dhiibtaa Agaasimaha/Maamulaha Dugsiga ama Maamulaha Khidmadda Dugsiga (School Fee Administrator) marka aad buuxisid. Dhamaan lacag bixinta khidmadda waxaa la joojin doonaa ilaa dugsiga ka gaaro go'aan haddii ardaygaada uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda. Kaddibna, waxaa lagu siin doonaa ogeysiis ku saabsan go'aanka la gaaray. Haddii ardaygaada uu xaq u leeyahay ka-dhaafid, dugsiga kaama rabo in aad buuxisid adeegga, in aad waafaqid qorshaha in aad kharashka ku bixisid kis-kis, ama in aad saxiixdid IOU baddalkii ka-dhaafidda.

ANIGA WAXAAN HALKAAN KU CADDEYNAA IN MACLUUMAADKA IYO WARQADAHKA KU LIFAAQAN AAN ANIGA SOO GUDBIYAY YAHIIN RUN IYO SAX ILAA INTA AAN OGSOONAHAY AMA AAMINSANAHAY.

TAARIKHDA: _____ SAXIIXA WAALIDKA: _____



Buuxi boggaan haddii aad xullatid fursadda #6 keliya haddii sida hoos timaado qeybta Aasaaska Ka-Dhaafidda Khidmadda.

XAQIJIINTA DAKHLIGA EE LAGA RABO DHAMAAN XUBNAHA REERKA:

(Waxaa loo rabaa ardayda aan xaq u yeelanin taasoo ku saleysan qeyb gaar ah.)

Dakhliga soo gaala reerka waxaa lagu ogaadaa marka leysku darro dhamaan dakhliga reerka ee ka soo baxa dhamaan ilaha kaddibna la barbar dhigo tirada dadka ka tirsan reerka. Reerka wuxuu ka kooban koox qof oo qaraabo ah ama aan ahayn, aan dagganeyn hay'ad amaguri lagu xeroodo, balse u nool sida hal unug dhaqaale. Tan macnaheeda waxay tahay in ay guud ahaan daggan yahiin isla guri iyo in ay qeybsadaan kharashka sida kirada, danabka iyo raashinka.

Waxaad dhamaan liiska dakhliga ku qortaa tiirka (tiirarka) ku habboon ka hor inta aan waxba laga goynin.

Magaca:	Dakhliga laga helo Shaqada (ka hor inta aan waxba laga goynin)	Xaqa/Soshal Sekuritiga Hawlgabnimada	Ceydha, Taakuleynta Xaaska, Masaruufka Cunugga, Dakhliga Kale	Wadarta Halkii Qof
Magaca dambe: Magaca dhexe: Xarafka hore magaca dhexe:	Dakhliga Bil Kasta	Dakhliga Bil Kasta	Dakhliga Bil Kasta	Dakhliga Wadarta Bil Kasta
1	\$	\$	\$	\$
2	\$	\$	\$	\$
3	\$	\$	\$	\$
4	\$	\$	\$	\$

TUSAALOOYINKA DAKHLIGA:

Dakhliga laga helo Shaqada	Xaqa/Soshal Sekuritiga Hawlgabnimada)	Ceydha, Taakuleynta Xaaska, Masaruufka Cunugga	Dakhliga kale
Mushaarka ku saleysan saacadaha la shaqeeyo, mushaarka go'an, manaafacaadka la qaato waqtiga shaqo joojinta, magta shaqo la'aanta, magta shaqaalaha, dakhliga laga helo ganacsiga qofka iskiisa u shaqeysto ama beerta	Xaqa beerta, kabidda, dakhliga sekuritiga, lacagaha hawlgabnimada, Dakhliga Soshal Sekuuritiga (sida SSL_da cunugga qaato)	*Lacagaha TANF*, lacagaha ceydha, taakuleynta xaaska, iyo lacagaha masaruufka cunugga	Manaafacaadka Itaala Darrida; lacagta caddaanka ee lagala soo baxo keydka; dul saarka iyo qeybsiga fa'iidada; dakhliga laga qaato hantida ma guuraanka, ammaanada, iyo maal gelinta, lacagta joogtada ee laga qaato dad aan la nooleyn reerka; dakhliga kirada; iyo dakhliga kale

Qaadashada kaalmada TANF waxay toos u aqoonsataa in qofka xaq u yeesho ka-dhaafidda khidmadda. Looma baahna caddeyn dheeraad ah oo la xariirta dakhliga. Fadlan fiiri qeybta Aasaaska Ka-Dhaafidda Khidmadda (Basis for Fee Waiver) kaddibna gudbi arjiga hoos yimaada xaq u yeelashada TANF.

NIDAAMKA XAQ U YEELASHADA DAKHLIGA

Sannad Dugsiyeedka:

Luulyo 1, 2021 - Juun 30, 2022

Tirada Reerka	Sannad kasta	Bil kasta	Labo Jeer Bil	Labo Todobaad Kasta	Todobaad kasta
1	16,744	1,396	698	644	322
2	22,646	1,888	944	871	436
3	28,548	2,379	1,190	1,098	549
4	34,450	2,871	1,436	1,325	663
5	40,352	3,363	1,682	1,552	776
6	46,254	3,855	1,928	1,779	890
7	52,156	4,347	2,174	2,006	1,003
8	58,058	4,839	2,420	2,233	1,117
Ku dar xubin kasta oo dheeraad ku ah qoyska	5,902	492	246	227	114

